

Waxaan ula dhaqanaa cabashooyinka ku saabsan adeegyadayada si darran

Sidii aad ugu soo gudbin lahayd cabasho AFSA

Marka ugu horeysa, waxaan kugu dhiirigelinaynaa, inaad la xiriirto shaqaalaha AFSA ee aad la macaamileysay si loo xaliyo arintaada. Haddii aadan ku jacsaneyn taas ama aadan ku qanacsaneyn jawaabtooda, waa inaad weydiisataa inaad la hadasho shaqaalahaas maareeyihiisa.

Waxaad sidoo kale ugu soo xareyn kartaa cabasho AFSA mid ka mid ah siyaalahan hoos lagu sheegay.

Taleefan – waxaad taleefan u diri kartaa Xarunta Adeega Qaranka AFSA si aad cabashadaada usameysid . Arimaha khuseeya musalifnimada, taleefan u dir 1300 364 785. Arimaha khuseeya Dammaanada Hantida Shakhsiga ah taleefan u dir 1300 007 777.

Adeega Turjumaada afka iyo qoraalka (TIS National) waxay bixisaa isticmaalka adeegyada taleefanka wax ka badan 160 luuqadood iyo lahjado adoo wacaya 131 450. Haddii aadan ku hadlin Ingiriis, waxaa kuugu sahlan inaad wacdo TIS oo weydii inay kuula xiriiraan Xarunta Adeega Qaranka AFSA.

Boosta ku dir – waxaad usoo dhigi kartaa cabashadaada AFSA GPO Box 2604, Adelaide SA 5001.

Interneetka – waxaad noogu soo diri kartaa cabashadaada si elektaroonig ah adoo buuxinaya foomka ‘nala soo xiriir’ ee website keena ah www.afsa.gov.au

Waxaan u qasdeynaa inaan ku dhammeyno cabashooyinka 14 maalmood gudahood kadib markaan helno. Marmarka qaarkood tani had iyo jeer suurtoagal maaha. Waxaa lagu wargelinayaa horumarka cabashadaada.